



Bidhaamin (In reflection)

Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka
kudeeqidda xubnaha iyo unugyada



Mucjisada Nolosha

Maanta waxaan markhaati ka noqday waxyaabo layaab leh. Maanta waxaan arkay mucjiso! Waxaan arkay cadceeda oo soo baxaysa. Waxaan arkay ilmo qoslaya. Waxaan arkay qoys isdhunkanaya. Waxaan ku arkay ubax beertayda. Kuwaas mid kasta oo kuwaas ka mid ah wuxuu ahaa mucjiso, sababtoo ah waxaa ahaayeen mucjisadii noloshayda.

Maalin kasta oo ka mid ah todoba iyo tobanka sannadood ee aan soo dhaafay waxaan jeclaystay ama aan xiisayey fursada labaad ee noloshayda ee ku-deeqidda xubintu ay i siisay.

Aniga oo ku hadlaya magaca qaateyaasha xubnaha oo dhan, waxaan siinayaa mahadnaq dadkii ku deeqay unugyada iyo xubnaha. Jeclaansha noloshooda iyo go'aankooda inay caawiyaan dad kale waqtiga ay dhimanayeen, waxay sii wadaan inay siiyaan nolol dad kale oo binu'aadam ah.

Waxaan kaloo u riyaqaayaa oo mahadnaq siinaynaa qoysaska ku-deeqaha oo dhan. Dadkaas, oo waqtiyadii argagaxa aan la malayn karayn adkaysi iyo naxariis u yeeshay musiibadaas; kuwaas oo ixtiraamay go'aanka qofka ay jeclaayeen iyaga oo ka wakiil ah, u ogolaaday dad kale inay helaan nolol iyo tayo nololeed oo aysan u suurtagasheen haddii kale.

Maalin kasta waxaan mahad u celiyaa laba qof oo jeclaa inay siiyaan qof aanay garanayn, wadne garaacaya iyagoon waayin garaacista wadnaha; si aan u arko cadceeda oo soo baxaysa; waxaan dareemayaa diiranaanta laabkuqabadka, waxaan urinayaa udgoonka ubaxa; waxaan dhadhaminayaa dhadhanka khudaarta; waxaana maqlayaa ilmaha qoslaya.

Kuwaas waa mucjisooyinka nolosha maalin kasta taas oo badiba dadku u qaataan wax iska caadi ah. Wax caadi dad kale u ahi aniga qayru-caadi bay ila yahiin.

Fiona Coote

© Organ & Tissue Authority 2014

Buugan yar waxa la soo saaray iyadoo lala kaashanayo hayadaha DonateLife oo ah qorayaasha asalka ahaa.

Telefoon: 02 6198 9800
Faagis: 02 6198 9801
enquiries@donatelife.gov.au
www.donatelife.gov.au

Marka aad muruugaysan tahay,
waxaad fiirisaa wadnahaaga,
waxaanad arki kartaa
runta, waxaad u ooyeysaa
qofkii ahaa farxadaada.

Kahlil Gibran



U hibayn


Buugani waxaa loo hibeeyey dadka ku deeqay xubnaha iyo unugyada iyo qoysaskooda, deeqsinimadooda owgeed, waxay ku badaleen nololsha dadka kale xubin ku-tallaalid.

Waxay kaloo u mahadnaqaysaa dadka kale ee jecel inay noqdaan ku-deeqe oo arintaasina aanay u hirgalin.



Tusmada

- 1 Horudhac
- 3 Qaybta kowaad – Murugo**
- 4 Waa maxay murugo?
- 4 Siday ii saameynaysaa murugadu?
- 8 Ilmaha iyo murugada
- 9 Sidee loola qabsan karaa sannadguurada iyo maalmaha gaarka ah?
- 11 Qaybta labaad – Taageero**
- 12 Adeegga taageerada qoyska ku-deeqaha ah
- 13 Xusidda ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada
- 14 Sheekooyinka qoyska ku-deeqaha ah
- 17 Erayada ay wadaagaan qoysaska deeqaha iyo kuwa Qaataha ah
- 18 Warqado ka yimid qaate xubin
- 20 Erayada hooyo ku-deeqaha
- 21 Xiriirka
- 23 Qaybta sadexaad – Ku-deeqidda**
- 24 Dariqooyinka ku-deeqiddaku-deeqidda xubnaha iyo unugyada
- 24 Dhimashada maskaxda
- 26 Dhimashada wadnaha
- 28 Macluumaadka iyo su'aalaha guud oo layska weydiyo ku-deeqidda
- 31 Macluumaadka iyo su'aalaha guud oo layska weydiyo ku-tallaaliddaku-tallaalidda
- 34 Mahad-celin



Horudhac

Buugan yar waxaa loo qoray in lagu caawiyo qoysaska iyo saxiibadood kuwaas oo la kulmay dhimashada dad ay jeclaayeen. Waxaan ku darnay macluumaadka ku saabsan ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada kuwaas oo jawaab u noqonaya su'aalaha hadhay.

Qoysaska ku-deeqaha iyo kuwa qaataha ku-deeqidda waxay si deeqsinimo leh ugu deeqeen buugan iyagoo oo la wadaagaya sheekooyinkooda qof ahaaneed. In kastoo aanad dareemahayn akhriska oo dhan waqtigan, waxaad helayaa macluumaad ku saabsan murugo iyo u-tacsiyeynta taasoo aan rajaynayno inay kugu caawin doonto inaad fahamto waxa laga filayo safarkaaga gaar ahaaneed.

Murugo

- 4 Waa maxay murugo?
- 4 Siday ii saameynaysaa murugadu?
- 8 Ilmaha iyo murugada
- 9 Sidee loola qabsan karaa sannadguurada iyo maalmaha gaarka ah?



Waa maxay murugo?

Dhimashada qofka aanu jeclayn waa waayo-aragnimo guud ayadoo dareenka murugada ee la socotaana yahay mid aan laga maadan karin. Way adag tahay gaar ahaan markii dhimashadu ay tahay mid degdeg ah ama aan la filayn uusana jirin waqti loogu diyaar garoobo – aysana jirin waqti aad ku tiraahdo nabad gelyo.

Waxaa laga yaabaa inaad dareentid argagax, jaahwareer iyo baqdin. Sidaadu aragto adduunku dhakhso ayey isku badashaa. Dareenkaaga ammaanka iyo nabadgelyada khalkhal baa gelaya, dareen ah inaad ku jirto “adduun aan dhab ahayn” ayaa dhacaya. Wax kaloo jiraya dareen caro iyo baahi weyn oo loo qabo in lagu canaanto qof kale waxa dhacay.

Arimo badan ayaa saamayn doona raadka dhimashu kugu reebto. Kuwaas waxaa ka mid ah da'da, iyo xiriirka, qofka dhintay cidu ahaa iyo sidoo kale xaaladihii ku wareegsanaa dhimashadooda.

Siday ii saameynaysaa murugadu?

Waxa lagamamaarmaan ah inaad ka warhayso inaysan jirin “qaab” gaar ah oo loo murugoodo. Ma jiro xadad waqtiyo u go'an oo aad “wanaag dareemayso” mana jiraan isbajoog “marxalad”. Qofaf ahaan waan ku kala duwan nahay sida aan ula qabsano. Si kasta ha ahaate waxaa jira falcelisyada qaarkood kuwaas oo guud dadka murugaysan u wada dareemo. Waxaan ku taxnay qaarkood xaga hoose si aad u garato naftaadu, iyo weliba waxyaalo kale oo aad jeceshahay inaan munaan siiso. In lala kulmo wax ka mid ah kuwaas dhamaan waa caadi.

Bidhaamin—Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Dareen Caadifad

- ▶ Badanaa kabuubyo iyo dareenka rumaysi la'aani waxay kaa caawiyaan inaad la qabsato maalmaha ama toddobaadyada hore. Hala yaabin haddii xaaladuhu ka sii daraan markii kabuubyadu kaa ba'do.
- ▶ Garo inay cadradu caadi tahay qaybna ka tahay murugada.
- ▶ U ogolow naftaada in ay murugooto – hay isku dayin inaad noqoto qof ku adag qof walba oo kugu meersan.
- ▶ U ogolow dadka in ay ogadaan siday kuugu caawin karaan – howlo la taaban karo iyo sidoo kale inay ku siiyaan taageero caadifadeed.
- ▶ Waxaa laga yaaba in ay isbadalsho baahida la socodka dadka kale mararka qaar kood aad doonto inaad isku kaliyeysato. U waji furnow dadka – way inay ogaadaan baahidaada.
- ▶ Waxaa laga yaaba inay kugu adkaato feegjignaantaada marka aad sameynayso shaqo fudud – haka rajeenin naftaada wax badan.
- ▶ Waxaa laga yaabaa inaad yeelato caadifad daran waqtiga murugada, taaso kuu qaylo dhaamisa. sidaasina maaha wax aan caadi ahayn, hase ahaatee haddii aad ka walwalsan tahay xoogga iyo muddada dareenkaagwaqti, haka cabsan inaad caawimaad weydiisato qof xirfad-yaqaan ah.

Jir ahaan

- ▶ Muhiimad gaar ah ayey leedahay inaad dayicin caafimaadkaaga. Waxaad ku jirtaa walac weyn waxaadna u nugushahay caabuqa. Waxaa laga yaabaa inaad dareentid niyad-jab.
- ▶ Isku day inaad si caadiya wax u cunto xitaa haddii aanad xiiso u hayn cuntada.
- ▶ Nadaamka hurdadaadu waxaa laga yaabaa inay isbadasho. Isku day inaad qaadata waqti maalintii si aad u nasato markaad awoodo.
- ▶ Iska ilaali cabidda khamri badan, maandooriye, iyo waxyaalaha kale oo waxyeellada leh.
- ▶ Haddii ay jiraan astaamo kaa walwalsiinaya, la-talin u doono dhaqtarkaaga degaanka.

Bidhaamin—Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Bulsho ahaan

- ▶ Saaxibada iyo qoysku badanaa way ku taageeraan waqtiga hore ee murugada hase ahaatee taageeradaas way sii yaraata marka waqtigu sii socdaba. Waxaa muhiim ah inaad awoodo inaadla xiriirto oo aad caawimaad ka raadsato markaad u baahato. Haka sugin inay gartaan baahidaada. Waxay badanaa u gartaan si qaldan waana dhib dhac.
- ▶ Kullanada bulshadu waxa laga yaabaa inay kaa saaraan dareenka walaaca gaar ahaan toddobaadka iyo bilaha hore. Naftaada u sahlanow doorana inaad dadka aad aaminsan tahay la joogto.
- ▶ Waqtiga murugada lagu jiro way adag tahay inaad garato xiriirada cusub. Way adag tahay inaad si dhab ah u aragto xiriirada cusub gaar ahaan haddii aad wali ku jirto murugo. Qofna kuuma badali karo wixii kaa lumay. Iskuday inaad u xiisayso dadka siday yihiin.

Dhaqaale ahaans

- ▶ Iska ilaali go'aano dagdag ah. Iska ilaali go'aano waaweyn ee noloshaada ah sanadka kowaad inay lagamamaarmaan yihiin mooyee.
- ▶ Guud ahaan, badiba dadku waxay ku degaan meelaha ay yaqaanaan ee agagaarkooda ah ilaa inta ay ka fiirsanayaan mustaqbal kooda ayagoo aad u deggan.
- ▶ Haka cabsan inaad la-talin ka doonato qof aad aamiinsan tahay.

Ruuxi ahaan

- ▶ Wuxuu qofku rumaysan yahay waxay u noqon kartaa il raaxo galin karta waqtiga lagu jiro murugada.
- ▶ Dadka qaarkii waxay helaan riyo, ama taabasho, ama dareen booqasho ee qofkii dhintay, taasina waxay noqon kartaa raaxo gelin.
- ▶ Marka aynu murugoona, waxaynu mudnaanta siinaa ama u qiimaynaa ictiqaadkeena iyo aragtideena sida adduunku u shaqeeyo iyo halka aanu kaga suganahay xaaladaha adduun.
- ▶ Waxaa laga yaabaa inaan ku mashquulsanahay macnaha waqtidhimashadii qofkii aanu jeclayn ilaa hadda.
- ▶ Waxaa laga yaabaa inay waxtarayso in mudnaanta la siiyo dhaxalkii ka tagtay caadifaddu aad ka heshay jacaylkii qof kaaga dhintay oo aad tiqiin

Bidhaamin—Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

- ▶ Wasiirka degaankaaga ama imaamada diinta waxaa laga yaaba inay ku siiyaan taageero.
- ▶ Dadka qaarkood waxay ka warbixiyaan isbadalka u dhaxeeya joogitaankii qofka jeclaayeen iyo maqnaansha qofka ay jeclaayeen aad bay u caawisaa.

Maxaa caawin kara?

Waqtii bay qaadanaasaa inaad la qabsato beya'dda qofkaad jeclayd lagu waayey. Waxyaalaha ugu yar ee aad filayso inay ku xasuusinayaan ama ay kugu kicinayaan dareen – miyuusig dabacsan, kursi madhan, urinta cadar aad jeceshahay.

Baro inaad garato waxa kuu shaqayn kara. Waxaad si dagdag ah u ogaanaysaa xubnaha qoyska ama saaxibada kuwaas oo kuu ogolaanaya inaad iskaa a ahaato aadna u muujiso murugadaada si micno kuu samaynaysa. Ka hadal qofkii dhintay kuna dhiirrigeli dadka kale inay sidoo kale ay kula qaybsadaan xusuustooda. Mararka qaarkood dadku waa ka meermeeraystaan inay ka hadlaan qofka dhintay ayagoo ka cabsanaya inay kaa sii caraysiiyaan. Waxaa laga yaabaa inay sugayaan inaad ogolaansho siiso.

Waxaa laga yaaba inaad ogaato inaad iskaa u qaadashada waqtii yar inay kaloo ku caawin karto – ku-qoridda dareenkaaga joornaalkal, booqashada meel gaar ah oo aad ammaan ka dareemi karto kuna siin kara xusuus farax leh, abuuridda buug xasuus qor ah. Waxyaabo kala duwan ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan waqtiyo kala duwan.

Mid kasta oo ka mid ah xubinta qoyska wuxuu lala leeyahay xiriirkiisa gaar ahaaneed qofka dhintay wuxuuna u dareemayaa raadkaas siyaabo u gaar ah.

Dareemadaas ma sii jirayaan waligood, in kastoo waqtiyada qaarkood laga yaabo inay sii xumaadaan halkii ay ka sii fiicnaan lahaayeen. Tartiib-tartiib markii waqtigu sii socdaba waxaa laga yaabaa inaad dareento faraqa u dhaxeeya:

- ▶ Waxaa laga yaabaa inaadhesho maalmo aad kuugu wanaagsan baddalkii maalmo kuu xun.
- ▶ Waxaad la qaybsan kartaa xasuustaada ku saabsan qofka dhintay waxaadna dareemi kartaa farxad badan halkii murugta.
- ▶ Si firfircoon ayaad u bilaabi kartaa inaad dib u maalgeliso nolosha aadna qorshe u samaysato mustaqbalka.

Bidhaamin—Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Ilmaha iyo murugada

Fahamka ilmaha ee dhimashada way kala duwan tahay waxayna ku xidhan tahay da'dooda. Xitaa caruurta yar yari waxay ogyihiin wax aad u xun inuu dhacay hase ahaatee aysan garan karin siday arintu u daran tahay.

Gurigoodu iyo qoyskoodu waxay siiyaan keliya dareenka nabdgelyo ay garan karaan. Waxaa laga yaabaa inay xaasaasi ku noqdaan naxdinta iyo khlkhalka kuwii ay badan raaxada ka heli jireen. Waxaa lagamamaarmaan ah dareen jaceel loo muujiyo iyo dhiirigelin.

Waxaa laga yaabaa inaad ka ogaato caruurta dabeecado diibucelis ah. Waxaa laga yaaba in ay u dhaqmaan sida markay caruurta ahaayaan. Tusaale:

- ▶ Waxaa laga yaabaa inay ku adkaystaan inay adiga kula agjoogaan ayna ka baqdaan inaad kala maqnaantaan.
- ▶ Nadaamka hurdadoodu waxaa laga yaabaa inay khalkhal gasho taaso ay ku jirto riyo xumo.

Maxaa caawin kara?

Waxaa jira waxyaalo aad samayn karto si aad u caawiso maskaxdooda oo ku xusan xaga hoose:

- ▶ Caruurta yar yar inta badan waxay ku muujiyaan naftooda markay ciyaarayaan. Waqti sii aad kula cayaarto waydiina inay sharxaan waxay samaynayaan.
- ▶ U fufurnow daacadna u ahow – u sharax waxa dhacaya sidii suragal ah ee ugu fudud.
- ▶ Ka-qaybgeli – waxay u baahan yihiin inay u sameeyaan 'wax gaar ah' qofka ay jecel yihiin – samee jardiin, ubax ku beer, u qaad waxay ay sameeyeen qabuurta. Noqo mid wax-abuur leh.
- ▶ U sheeg iskuulka waxa dhacay sida ugu dhaqsaka badan. Taasi waxay siinaysaa macalimiinta waqti ay ku qorsheeyaan sida ugu haboon oo ay ku caawin karaan caruurta markay ku soo noqdaan fasalka.
- ▶ Keliya in la ogaado qaar ka mid ah dareemadaasi waa wax caadi ah shakigana kaa saaraysawaalid ahaan. Si kasta ha ahaatee, haddii uu jiro waqti aad ka fikirayso sid ilmahaagu ula qabsanayo arintaas, haka labalabayn inaad la-talin ka raadsato xirfad-yaqaan adoo u sii maraya dhaqtarka degaankaaga.

Waxaa jira buuggag badan oo aad ugu fiican caruurta iyo waalidka, liiska qaar buuggagtaas ka mid ah waxaa laga heli karaa haya'dda DonateLife ee dowladgobaleedkaaga ama teratoorigaaga.

Bidhaamin—Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Sidee loola qabsan karaa sannadguurada iyo maalmaha gaarka ah?

Sannadguurada iyo maalmaha gaarka ah uma daganaanayaan si la mid ah la'aanta qofkaad jeclayd. sanadka kowaad gaar ahaan wuxuu noqon karaa mid xanuun badan. Waxaa jira 'wax is biirsanaya' maalin kasta oo muhiim ah taaso oo sii kordhinaysa dareenka walaaca ah oo ay ku xidhantahay 'sidaad uga gudbayso'.

Maxaa caawin kara?

- ▶ Hore u sii qorshayso – si furan ugala hadal qoyskaaga waxii ku saabsan maalintaas – qof kastaa wuxuu yeelan doonaa baahi iyo rajooyin kala duwan.
- ▶ Caruurta gaar ahaan waxay raadsadaan u-xaqiijin in noloshu qoyskii inay u sii jirayso 'si caadi ah' intii suurtagal ahaba.'
- ▶ La qaybso maalinta dadka aad jeceshahay ee aad ka dareemaso raaxo.
- ▶ Waxaa laga yaabaa inaad doorato wax ka duwan xuska qoys ee caadiga ahaa aadna abuurta caado qoys cusub.
- ▶ Iskuday inaad ka dhigto maalintaas mid macno leh.
- ▶ U ogolow dadka kale inay kaa caawiyaan qorshahaas, adigoo xasuusanaya, inay waqtigaaga gaarka ah tahay.
- ▶ U ogoloo naftaada inaad la wadaagto qosolka iyo ilmada dadka kugu wareegsan – waxaa laga yaabaa inay muujiyaan dareenkooda iyaguna sidoo kale.
- ▶ Noqo qof abuurta xasuusta qaraabadaada – daar shumca, soo iibi waxyaabo lagu qurxiyo geedka ciida kirismaska (Christmas), soo iibi wax gaar ah oo qoysku oo dhan wada jeclaadan.
- ▶ Caruurta waxa laga yaabaan inay sameeyaan sawir ama warqad wax u qoraan qofkii dhintay.
- ▶ U naxariiso naftaada – samayso hadaf run ah.
- ▶ Kaydi xasuusta qaraabadaada qaaliga ah – waligaa waxaad ku sidan doontaa qalbigaaga.

Bidhaamin—Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Taageero

- 12 Adeegga taageerada qoyska ku-deeqaha ah
- 13 Xusidda ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada
- 14 Sheekooyinka qoyska ku-deeqaha ah
- 17 Erayada ay wadaagaan qoysaska deeqaha iyo kuwa Qaataha ah
- 18 Warqado ka yimid qaate xubin
- 20 Erayada hooyo ku-deeqaha
- 21 Xiriirka



Adeegga taageerada qoyska ku-deeqaha ah

Adeegga Taageerada Qoyska Ku-deeqaha Qaran ah waxaa loo sameeyey inuu siiyo taageero qoysaska ku-deeqaha xubnaha iyo unugyada ka hor, iyo inta lagu jiro ama ka dib ku-deeqidda. Taageerada waxaa loo bixiyaa siyaabo kala duwan waxayna ku kala duwan tahay ayadoo ku xidhan baahidaada hadda iyo mustaqbalka.

Ayagoo qayb ka ah adeegga Isu-duweyaasha Taageerada Qoyska ku-deeqaha ah waxaa laga helaa Haya'dda DonateLife ee dowlad gobaleedka iyo teritooriga kasta. Isu-duweyaasha Taageerada Qoyska ku-deeqaha ah waad heli kartaa si uu adiga iyo qoyskaagu u taageero waqtiga lagu jiro waayidda qofka dhintay. Halkaa wuxuu u joogaa inay ku dhegeystaan; inay kuu siiyaan macluumaad iyo hubanti kaagana jawaabaan su'aal kasta ama waxaad tabanayso oo aad qabto. Waxaa laga yaabaa inaad ogaato inay waxtar badan leedahay inaad la hadalsho qof kale oo ka baxsan qoyskaaga dhow. Adeegga waxaa ka mid ah la-talinta ama u gudbinta la-taliyeyaasha murugada ee degaanka haddii la doono.

Xiriirka kowaad ee Haya'dda DonateLife waxaad ka baran doontaa tirada ay le'eg yihiin dad badan oo lagu caawiyey ku-tallaalidda iyo sida ay u socdaan. Qoysaska ku-deeqaha iyo qaateyaasha ah waxay labaduba u nugul yihiin una baahan yihiin waqti ay bogsoodaan ulana qabsadaan xaaladaha kala duwan.

In kasto aqoonsiga qaataha xubinta aan la shaacinayn, Isu-duwaha Taageerada Qoyska ku-deeqaha ah ama Isuduwaha ku-deeqaha wuxuu masuul ka yahay u soo gudbinta xiriiradaada haddii aad doonaysid. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa inaad doonayso inaad warqad u qorto qaataha xubinta ama aad ka jawaabto warqadooda adoo maraya isla dariiqii.

Haddii ay jiraan waqtiyo aad dareemayso inaad jeceshay inaad sidaas samaysayso, Isu-duwahaaga Taageerada Qoyska ku-deeqaha ah ayaa awoodi doona inuu ku caawiyo.

Mustaqbalka haddii aad jeceshahay inaad sii ogaato arinta qaataha xubinta, taas waxaa fududayn adoo mara isla dariiqii. Joogtayntua lays kuma siiyo si joogto ah, maaddaama aysan jeclayn qoysaska oo dhan in la ogaado haddii ay duruufuhu isbadalaan sanado ka dib.

Xusidda ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada

Sanado badan, haya'daha ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada ee Australia waxay horumariyeen dariiqoyin gaar ah oo ay ku mahadnaqayaan deeqsinimada dhammaan ku-deeqeyaasha xubnaha iyo unugyada iyo qoysaskooda.

Adeegyada DonateLife ee Xasuusta

Ujeedada Adeegyada DonateLife ee Xusidda sannadlaha waa inay ku siiyaan shir ay ugu mahadnaqayso uguna shukrinayso ku-deeqeyaasha iyo qoysaskooda. Waxay kaloo fursad u tahay dhammaan kuwa ay taabatay ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada si ay ula kulmaan dadka kale oo noloshooda isbadashay waayoaragnimadaani.

Furaha Taageerada Qoyska ku-deeqaha ah

Furaha gaar ah ayaa loogu habeeeyey qoysaska ku-deeqaha xubnaha iyo unugyada.

DonateLife Buuga nolosha

DonateLife Book of Life waa ururin sheekooyin laga soo helay kuway taabatay ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada. Sheekoyinku waxay xusayaan deeqsinimada nololihii sida musiibada iyo dedegga lagu waayey. Book of Life waxay ka bilowday safarkeedii Australia Toddobaadkii DonateLife, bisha February 2011. ayadoo ay ugu wacan tahay sumcadeeda waxay noqotay qayb joogta oo ka mid ah kaydka DonateLife iyo meelaha halkaasoo sheekooyinka ku-deeqaha iyo ku-tallaalidda lagu sheego. Book of Life waxaa laga heli karaa DonateLife website (www.donatelife.gov.au).

Fahfaahin dheeraad ah ee waxyaalaha kor ku xusan, fadlan kala xidhiidh Haya'da DonateLife ee dowladgobaleedkaada ama teritoorigaaga.

Sheekooyinka qoyska ku-deeqaha ah

Labo qoys ayaa si deeqsinimo leh nala wadaagey waayo aragnimadooda qofnimo.

Sheekada kowaad

Maalin daruur leh oo bartamaha July ah dhowr sano ka hor, waxaan taleefan ku helay in wiilkayga wayn ee aan jecelaa ayaa si dhakhso ah u dhintay ka dib markii uu gaaray dhaawac madaxa ahi. Waxay ka dhalatay shil baabuur oo ku dhacay isagoo ka soo socda shaqada ilaa guriga.

Saacado yar ka dib, carmaladiisa dhallinta yar, iyadoo muruugaysan markii uu la soo xiriiray Isu-duweyaasha ku-deeqidda si ugala hadlo suurtagalmimada ku-deeqidda unugyada, waxay awoodi kari wayday inay samayso go'aankii looga baahnaa.

Anoon ka warqabin in wiilkaygu u diiwangashanaa ku deeqe, hase ahaatee anoo ku aqiin qof dadka jecel, fikrad dheeri, daacad iyo naxariis badan, ruuxi ahaa xagga nolosha, wax labalabayn ah kamaan qabin inaan bixiyo ogolaanshaha ka-jarista unugyada la waydiistay. Anagoo caddaynayna haddii uu sidaas jecelaa inaan xaq u lahayn inaan u diidno doonistii ahayd inuu ku deeqo markii loo baahdo, marka u dambaysa oo uu dhinto.

Ka dib ku-deeqiddii unugyada, waxaan awoodi karney inaanu eegno jirkiisa waxaan ogaanay inuu u e'kaa siduu markuu hurdo ahaa. Waqti ka dib waxaan helay warqad farxad-gelisey wadnahayga oo aan ka helay Isu-duwaha ku-deeqidda taas oo uu iiga mahadnaqayo ku-deeqiddii unugyada wiilkayga.

Waxaan ku faanayaa inaan idiin la wadaago in wiilkaygu ku-deeqay indhihiisa, fakadaha wadnihiiisa, lafahiisa lugaha iyo seedihiiisa. Waxaa kaloo ii sharaf ah inaan idiinla wadaago in ku-deeqiddiisu ay keentay in laba qof mid lab ah iyo mid dheddig oo ku jira da'dooda dhexe ee sodomaadka, ay aragoodii u soo celisay, iyo in toddoba iyo toban dad kale ahna ay heleen lafo lagu tallaalay, - shan ka mid ah xubin qaatayaashaasna ay caruur yihiin.

Wiilkaygu wuxuu dhintay intaanu ilmo aabo u noqon hase ahaatee intaas ka badan kuma sii faani karo. Dhimashadiisu, ayadoo ay ugu wacan tahay haddiyadda uu bixiyey, wuxuu badbaadiyey nolosha dad badan – oo aan ahayn keliya kuwa helay ku-tallaalka unugyada, hase ahaatee qoysaskooda iyo qaraabada qoysaskooda kale. Waxaan hubaa inay aad ugu faraxsan yihiin tayada nolosha hagaagtey oo ay qaraabadoodu ku raaxaysanayaan.

Aqoontani waa raaxo joogta ah ay helayaan qoysakayga iyo naftayda.

Sheekada labaad

Nolosha, sidaan ku naqaan, way isku kaayo badashay dhowr sano oo hore. Waxay ahayd subax hore. Waan soojeeday anigoo ka-fiirsanaya maalinta kale oo cusub markii aan si lama filaan ah ka maqlay boohin ka imanaysa qolka nagu xiga. Waxay ahayd gabadhaydii yareyd oo kureyga ahayd. Waxay igu tiri “Hooyo, madaxayga waxaa la moodaa inuu qarxayo. Uyeedh dkaqtar. Waxbaa qaldane!”

Shan iyo toban daqiiqo gudahood way ku miyir beeshay. Intii aan u yeerayey ambalaaska waxay joojisay neefsigii, neef baan ku afuufayey ayada ilaa intii ambalaaskii na soo gaarayey. Isbitaalka ayey joogtay shan iyo afartan daqiiqo gudahood ilaa intii aan maqlay boohinteeda. Waxaa bilaabay riyadii ugu xumayd waalidka.

Waxay ahayd dhowr saacadood ka hor intaan ogaanay waxay ahayd dhibaataadu. Kadib sawirka CT skaanka waxay ogaadeen inuu ku dhacay dhiigfuran maskaxda. Afar saac ka dib waxaa la dhigay qolka Daryeelka Degdega ah. Waaxna awoodnay inaanu u tagno. Waxay u e'kayd 'caadi' in kastoo ay huruday. Way diiranayd. Xabadkeeduna kor iyo hoos buu u kacayey. Mey jirin astaan cad oo u muuqata inay waxba ka qaldan yihiin. Waan rumaysan weyney wixii dhacay dhowrkii saacadoo hore ee la soo dhaafay.

Dhaqaatiirtu waxay la yeesheen kulankii qoyska ee kowaad isla markiiba ka dib markaan ku aragnay qolka Daryeelka Dagdaga ah. Waxay noo sheegeen inaanay garanahayn sababta uu dhiiggu ugu furmay hase ahaatee ay masiibo tahay inaysan jirin wax rajo oo ka soo-bogsood ah. Ka dib markaan arintaas maqalnay, fikradayda kowaad waxay ahayd inay wali 'nooshahay' markaasna aabaheed iyo walaasheeda wayn, oo labadooduba ka shaqeynayey gobal kale, ay u soo gaadhaan si ay ugu yiraahdaan nabad gelyo. Intaas waxaa xigeey, inaan iri waxay doonaysay inay noqoto kudeeqe. Si kasta ha ahaatee dhaqaatiirtu waxay si dhaqso ah iigu sheegeen inaan arintan laga wada hadli karin ilaa dhimashada masakaxda la ogaado iyo in wax baaris ah la qabanayn ilaa iyo afar iyo labaatan saacadood.

Waxaan ka wada hadalnay ku-deeqidda xubnaha markay baranaysey ruqsadda bartaha liisankeeda baabuurka waxaanay tidhi waa sida saxdaa ah oo la samayn karo. Nasiib wanaag, ma jirin wax-shaki ah oo maskaxdayda ku jirey inay ogolaatay arintaas. Waxaan mar kasta rumaysanaa in ku-deeqidda unugyada ahayd sida kali ah ee wax fiican kaga iman karo xaalad masiibo ah hase ahaatee waligay kama fakarin inay anaga nagu dhacayso sidaasi. Aabaheed iyo walaasheed ayaa mar dambe maalintaas yimid, waqti badan baana la joogney ayada. Walaasheeda yar waxay keentay Walkmankeediiwaxaana daarnay CD yaday jecelayd. Wiilkii saaxibkeeda wuxuu ka hadlay qorshaheeda iyo riyadeeda oo dhan oo aan la fulin. Waan ag fadhiistay waxaana qabtay gacanteeda waxaan u rajeeyey oo aan u baryay inay wali sii 'joogto' oo ay maqasho sidaan u jecelnahay oo aan u waayi doono.

Baaristii dhimashada maskaxda maalintii dambe waxay noo cadeeyeen baqintii noogu xumeyd ayadoo markaas habkii ku-deeqidda xubnaha la bilaabay. Waxaa jiray waqtiyo aan naftayda ula fikray inaan 'ku degdegney ka samriddeeda - ka dib markii ay dad badan ka soo kaceen koomada ayagoo OK ah'. Markaas waxaan la hadlay kalkaaliyaasha waxaan markaas xusuustay baariyadii xaqiiqda ahaa ee la sameeyey waxaana rumaystay inaanay macna lahayn intay ku xidhan tahay qalabka neefsashada oo aanay marna soo kacahayn.

Eegidda albaabka liftiga oo xidhmay markii loo qaadayey qolka qalliinka ee ku-deeqidda xubnaha waxay ahayd qalbi-jab', hase ahaatee waxaan hubnay inay ahayd wax sax ah oo la sameeyo. In kastoo aan ku jirney xaalad xanuun badan, waxaa raaxo noo ahayd inaan ogaano in dad kale 'meel kale jooga' ku faraxsan yihiin in qaraabadii la siiyey fursad labaad oo nololeed.

Dad badan ayey saameysey dhimashada gabadhaydii, markaas in kastoo aanay cid ka dhigaheen wax caadi ah halkan inaysan joogin si ay u fuliso riyadaydii, dhaxalka ay ka tagtay ayaa ahaa mid qiimo weyn leh. Ma jirto waxaynu samayn karayno inaan ka hor tagno dhimashadeeda, hase ahaatee ku-deeqidda xubnaha macnaheedu waxa weeye dhimashadeedu inaysan ahayn mid macna la'aan ah. Qaateyaasha xubintu ma ogaan doonaan qofka ay ahayd, hase ahaatee waxaan hubaa in mar walba ay xasuusan doonaan dadkan aan la garanayn oo helay fursad labaad oo ay ku noolaadaan waayo "haddiyadeedii nolosha".



Si aad u eegto ururinta sheekooyinka nolosha-badbaadiya iyo kuwa nolosha-wax-ka-badalay oo laga helay dadka ka faai'deystey ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada, booqo: www.donatelife.gov.au/resources/book-of-life

Bidhaamin — Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Erayada ay wadaagaan qoysaska deeqaha iyo kuwa Qaataha ah

Dhamaantiin waad ku mahadsantihiin daryeelkiina iyo erayad naxariista leh – waxay samaysay isbadalkaas

Qoyska Ku-deeqaha ah

Xaqiiyada dadkii aan jeclayn inay awoodeen inay ku caawiyeen dad kale ku-tallaalid waxay noo ahayd raaxo wayn. Farxad weyn bay ayagana u tahay markasta.

Qoyska Ku-deeqaha ah

Dhammaan taageeradii aynu helnay waxay naga caawisay inaynu xal u helno qasaaraheeni waxayna noo muujisay intaad na daryeelayso.

Qoyska Ku-deeqaha ah

Keliya inaad tiraado 'mahadsanid' waxay u e'gtahay midaan ku filnayn...

Qaate xubin mahadnaqaya

Bidhaamin — Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Warqado ka yimid qaate xubin

Ku: qoyska ku-deeqaha ah ee 'gaarka ah',

Erayo kuma soo koobi karno waxa go'aankiinu macno noo samayno anaga iyo ninkayaga yar oo haddaafar jirka ah. Waxaa loo qabtay inuu noolaan karo hal toddobaad keliya markii beerkiisu istaagay sabab la'aan. Waxay nagu ahayd argagax wayn, maaddaama mar walba uu caafimaad qabey. Ka dib markaan in yar joogney isbitaalka degaankeena wuxuu mar dambe helay ku-tallaalis badbaadisay noloshiisa. Haddii uusan jireen go'aankiina, wuu dhiman lahaa. Go'aankaas wuxuu dhambalay wadnahayaga, anagoo ku ducaysanaynay inaan ku-deeqe helno, waxaanu ogaanay in cid kale qof qaraab ah waayeyso.

Ilmahayagii ee ciyaarta badnaa, ee qqaaliga ahaa, hada wuxuu helay caafimaad buuxa wuxuuna u nool yahay sida ilmo caadiya oo afar jir ah. Anaga iyo qoyskayagu aad baanu kuugu mahadnaqaynaa.

Waxaan rajeynaynaa inay warqadani ku siiso farxad waqtiga aad murugta. Ku jirto. Wiilkayaga oo kali ah maadan badbaadin, waxaad badbaadisay walaal, ilmo awoowe u tahay, ina-adeer, iyo wiil walaal dhalay.

Gacaliye qoyska ku-deeqaha ah,

Hooyaan ahay siddeed iyo toban bilood oo hore waxaan ogaaday in aragga indhaygu sii xumaanayo. In yar ka hor karismas (Christmas), waxaan la soo kacay araggii oo ciira iyo ciirayaamo leh, taas oo baqdin lahayd. Waxaan wacay dhaqtarkayga GP kaasoo dagdag iigu diray xeeldheeraha indha kaaso iga helay Fuchs Dystrophy Syndrome, taasoo ah cudur indha oo la iska dhaxlo, taaso u baahan ku-tallaalidda wiilka labada indhoodba. Markaan dib u eegay aragayga aad buu u sii yaraanayay waxaana xasuustay anigoo wax u akhriyaya gabadhayda inay igu adkaatay, tooj baan qaatay si aan ugu akhriyo. Aabahay wuxuu qabey xanuun kaas oo kale oo loo sameeyey ku-tallaalid wiilka isha. Markaas wax yar baan ka ogaa habkaas, hase ahaatee waxaan wali ahaa qof kacsan oo baqanaya. Tilifoon baa soo dhacay afar bilood kaliya intaanu ku jiray liiska sugista, in kastoo aan naxsanaa, waxaan rajeynayey inaan maalin uun mar labaad wax arki doono oo aan wax u akhriin doono gabadhayda.

Toban bilood ayaa hadda ka soo wareegtay ilaa intaan helay ku-tallaalidda wiilka indhaha maalin i-dhaaftaana ma jirto oo aanan ka fakirin ku-deeqahayga, kaaso i siiyay fursad aan wax ku arko. Haddii aanu qoysku dooran lahayn inuu ku deeqo, kuumaan sheegi karayn fikradayda iyo mahadnaqayga wixii la isiiyay.

Imika waxaan awoodi karaa inaan wax u akhriyo gabadhayda lix jirka ah inaan ku caawiyo inay barato akhriska. Toddobaadkii hore markii iigu horaysay waxaan arkay baro sanko kaga yaala. Si fudud uma sheegi karo sida ay la yaabka u leedahay waayo arignimadani yar iyo siday ahayd.

Jacaylka iyo mahadnaqa aan u dareemayo qoyskan iyo qaraabadda lama sheegi karo. Deeqsinimadda iyo jaceelkooda nafti-huridda ah wuxuu isiiyay aragti aan ku arko gabadhayda. Ma siin karo mahadnaq kufilan, keliya inay halkaas igaga dhigeen hooyada ugu faraxsan adduunka. Ku-deeqidda la'aan maan awoodi kareen inaan qoro warqadan.

Ka timid bartamaha qalbigayga, mahadsanidiin. Waad ku mahadsan tihii haddiyadda aragtida. In kastoo aan waligeen kulmahayn, qoyskani wuxuu mar walba idiin ku haynayaa maskaxdooda iyo ducadooda ... MAHADSANIDIIN!

Erayada hooyo ku-deeqaha

Gacaliye qaataha xubinta,

Shaqadayda waxaan u socdaalaa masafooyin fog fog, taaso isiisa waqti iigu filan oo aan ku fakaro. Markaan aan u soo socdaalayey gurigayga habeyn hore, waxaan ka fikirayey dadka helay xubnaha qaraabadayada siday yihiin. Bal ka fikir farxadayda markaan helay warqadiina. Jawaabo ahaan waxay i siinaysaa farxad wayn inaan kuu rajeeyo wanaag mustaqbalka.

Waxaan ka fikirayey in qayb ka mid ah ruuxii ilmahaygu kula nooshahay. Ku-deeqahu wuxuu ahaa qof run ahaantii qof fiican; daryeel badan; u samaysta saaxiibo dagdag; deeqsi badan; ciyaaryahan ah, jecel wax kastoo dabada lagu sameeyo. in kastoo aan si aada uga murugoonay dhimashadiisa, haddana xasuustiisu waxay ahayd mid macaan.

Wax ma ku waydiin karaa? Keliya u sheega qoyskaaga iyo saaxiibadaada kuu dhow in aad lagu jecelyahay. Aad baan u nasiib badanahay in la iiii sheegay “inaan ku jecelahay, Hooyo” waqtiyo gaar ah, si aan la filahayn waqti yar ka hor waxay ahayd mid ka mid ah xasuusaha ugu qaalisan.

Isilaali ilaahayna haku barakeeyo.

donate life



Xiriirka

Organ and Tissue Authority

Level 6, 221 London Circuit
Canberra City ACT 2600
Phone: 02 6198 9800
Fax: 02 6198 9801
enquiries@donatelife.gov.au

DonateLife ACT

Canberra Hospital, Building 6, Level 1
Yamba Drive, Garran ACT 2605
Phone: 02 6174 5625
Fax: 02 6244 2405
organ.donation@act.gov.au

DonateLife NSW

Level 6, 4 Belgrave Street,
Kogarah NSW 2217
Phone: 02 8566 1700
Fax: 02 8566 1755
nsworgandonation@sesiahs.health.nsw.gov.au

DonateLife NT

1st Floor, Royal Darwin Hospital
Rocklands Drive, Tiwi NT 0810
Phone: 08 8922 8349
Fax: 08 8944 8096
donatelife@nt.gov.au

DonateLife QLD

Building 1, Level 4,
Princess Alexandra Hospital
199 Ipswich Road,
Woolloongabba QLD 4102
Phone: 07 3176 2350
Fax: 07 3176 2999
donatelife@health.qld.gov.au

DonateLife SA

Level 6, 45 Grenfell Street,
Adelaide SA 5000
Phone: 08 8207 7117
Fax: 08 8207 7102
donatelifesa@health.sa.gov.au

DonateLife TAS

Hobart Corporate Centre
Level 3, 85 Macquarie Street
Hobart TAS 7000
Phone: 03 6270 2209
Fax: 03 6270 2223
donatelife.tasmania@dhhs.tas.gov.au

DonateLife VIC

Level 2, 19–21 Argyle Place South,
Carlton VIC 3053
Phone: 03 8317 7400
Fax: 03 9349 2730
donatelife@redcrossblood.org.au

DonateLife WA

Suite 3, 311 Wellington Street,
Perth WA 6000
Phone: 08 9222 0222
Fax: 08 9222 0220
donatelife@health.wa.gov.au

Macluamad dheerad ah ka eeg kaydka iyo warqadaha caawimada ee laga helayo hayada DonateLife ah dowlad-gobaleedka ama teritooriga.

Bidhaamin — Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada

Ku-deeqidda

- 24 **Dariqooyinka ku-deeqidaku-deeqidda xubnaha iyo unugyada**
- 24 **Dhimashada maskaxda**
- 26 **Dhimashada wadnaha**
- 28 **Maclumaadka iyo su'aalaha guud oo layska weydiyo ku-deeqidda**
- 31 **Maclumaadka iyo su'aalaha guud oo layska weydiyo ku-tallaalidaku-tallaalidda**



Ku-deeqidda

Waqtiga ku-deeqiddu socoto adiga iyo qoyskaagu waxaad helayaan macluamad badan waqtigaas oo caadifad iyo walaac badan . Markaa waqtigaas la dhaafu dadku waxay si cad u xasuustaan dhacdooyinka waxayna jeclaadan inay helaan macluumaad dheeraad ah, ama si fudud waxay u xaqiijiyaan fahankooda siday wax u dhaceen. Boggaga soo socda waxay bixinayaan macluamad iyo jawaabaha su'aalaha guud qaarkood ee ay qoysaska iyo saaxiibadu iska waydiiyeen ku-deeqidda.

Dariqooyinka ku-deeqiddaku-deeqidda xubnaha iyo unugyada

Ku-deeqidda waxaa si fudud loogu sharxi karaa ayadoo la sifeeyo labada dariiqo ku-deeqidda kuwaas oo ay suuragal tahay in lagu deeqo xubnaha iyo unugyada dhimashada ka dib.

Himashada waa in la sii ogaadaa ka hor intaysan ku-deeqiddaku-deeqidda dhicin. Waxaa lagu ogaan karaa dhimashada laba siyaabood:

- ▶ Dhimashada maskaxda waxay dhacdaa markii maskaxdii qofku si joogto ah shaqada u joojiso.
- ▶ Dhimashada wadnaha waxay dhacdaa markii wadnaha qofku si joogto ah shaqada u joojiyo.

Waxaa muhiim ah in aad fahamto faraqa u dhexeeya dhimashada maskaxda iyo dhimashada wadnaha. Sida uu u dhinto qofku waxay saamaysaa sida howl-socodsiiinta ku-deeqidda u dhacayso iyo kuwa ay noqonayaan xubnaha iyo unugyada lagu deeqayo. Waayo-aragnimadaada habka ku-deeqidda way kala duwan tahay waxayna ku xidhan tahay bal in qofkaagii aad jeclayd inuu ku deeqay ka dib dhimashadii maskaxda ama dhimashadii wadnaha.

Dhimashada maskaxda

Waa maxay dhimashada maskaxda?

Dhimashada maskaxdu waxay timaadaa marka ay maskaxdu si un u dhaawacanato oo ay guud ahaan iyo joogto ahaan u joojiso shaqadeedii. Tani waxay ay dhici kartaa ayadoo ka dhalata marka uu madaxa ka gaadho daawac halis ah, dhiig ku furma maskaxda sida faaliga ama dhiig-bax, caabuqa maskaxda ama buro, ama maskaxdoo heli weyday ogsajiin (oxygen).

Sida qeybaha kale ee jirka markii maskaxda dhaacwac gaadho wey barartaa. Maskaxdu waxay ku jirtaa sanduuq adag, lafta madaxa, taasoo taasoo sida caadiga ah ka ilaalisa

halista hase ahaatee waxay kaloo xadidaa inta ay maskaxdu fidi karto marka ay bilowdo inay bararto. Tani way ka duwantahay qeybaha kale ee jirka sida dhaawac gaadha canqowga, taas oo sii bararta xad la'aan. Haddii ay maskaxdu sii bararto, cadaadiska baa ku badanaya lafta madaxa taasoo keenaysa saamayn waxyeello joogto ah.

Bararku wuxuu cadaadis saaraa jirdda maskaxda, halkaas oo maskaxdu kaga xidhan tahay xanguulada dhabarka ee qaybta hoose iyo laqunta. Jiridda maskaxdu waxay qabataa shaqooyin badan oo lagama maarmaan u ah noloshu oo ay ku jiraan neefsashada, wadna garaaca, cadaadisga diigga iyo heerkulka jidhka.

Marka uu bararka maskaxda sii bato, cadaadiska gudaha lafta maskaxdu wuu sii kordhaa ilaa la gaaro meel ay xididdaada dhiigga aadaya unugyada maskaxda ay xannibnaan. Ugu dambayntii dhiigga, ay ogsajiintu ku jirto wuxuu joojinayaa inuu maskaxda gaadho. (Fiiri sawirka 1). La'aanta dhiigga iyo ogsijiinka unugyada maskaxdu unugyada wey dhintaan. Ayagoo ka duwan unugyada kale ee jidhka, unugyada maskaxdu dib uma kori karaan mana soo noqon karaan. Haddii unugyada maskaxada dhintaan, markaas maskaxda qofku mar dambe ma shaqeynayo, qofkuna wuu dhintay, taasoo loo yaqaan 'dhimashada maxkaxda'.

Maskaxda iyo jiridda maskaxda waxay qabtaan shaqooyinka muhiimka ah ee jidhka, sida neefsashada. Marka qofka dhaawac ka soo gaadho maskaxda, waxaa lagu xidhaa qalab lagu magacaabo neef-siye (ventilator), kaas oo si aan dabiici ahayn ku wareejiya ogsijiinka (oxygen) sambabadooda. Ka dibna ogsijiinka ayaa ogsijiinka ayaa wadanuhu ku buufiyaa jidhka intiisa kale. Garaacista wadnuhu kuma xidhna maskaxda, hase ahaatee waxaa maamula xawaareeyaha dabiiciga ah ee wadnaha kaaso sheqeeya marku helo ogsijiin.

Marka qalabka neefsashadu (ventilator) uu siinayaa ogsajiinta jirka, xabadka qofka waa sii wadaa inuu kor iyo hoos u kaco taasoo siinaysa muqaal neefsasho, wadnahoodu waxay sii wadaa inuugaraacid sameeyo waana diiran yahay marka la taabto. Calaamadaasi waxay sii adkaynayaan fahanka dhimashada maskaxda. Si kasta ha ahaatee, xataa sii wadidda hawo-siinta, wadnuhu ma sii wadayo inuu si joogto ah u garaco ugu dambayntana waa joojinayaa shaqada.

Sidee ku ogaadaan dhaqaatiirtu in maskaxda qofku dhimatay?

Dadka aadka ugu xanuunsan isbitaalka waxaa si joogto ah ula socda khabiir cafimaad iyo koox kalkaalisooyinka oo si dhow u ilaaliya isbadalkooda iyo xaaladooda. Waxa jira dhowr isbadalo jireed oo ku yimaada marka ay maskaxdu ay dhimato. Kuwaas waxaa ka mid ah marka la waayo in wiilka indhaha uu xaasaasi ku noqdo ilayska, kariwaayana inuu neefsado la'aanta qalabka neefsashada, iyo yaraata garaacista wadnaha, cadaadisga dhiigga iyo heer kulka jidhka.

Marka ay koox caafimaadku eegto isbadalkaas waayo sameeyaan tijaabada dhimashada maskaxda si ay u hubiyaan inay maskaxdu joojisay shaqada iyo in kale.

Labo dhaqtar oo sare ayaa ku sameeya tijaabooyin cafimaad oo isku mid ah sariirta agteeda. Dhaqaatiirtu waxay sameynayaan tijaabada dhimashada maskaxda waxayna eegayaan inuu leeyahay qofku arimahan:

- ▶ Inuu ka falceliyo tijaabo xanuun leh;
- ▶ Inuu ka falceliyo wiilka indhaha ilayska;
- ▶ Falcelis ilbiriqsi ah marka indhaha laga taabto;
- ▶ Dhaqdhaqaaqa indhaha marka biyo baraf qaboob ah looga shubo godka dhagaha;
- ▶ Falcelis qufac ah ama af xirid ah marka gadaasha hunguriga laga taabto; iyo
- ▶ Awooda inuu qofka neefsado marka laga furo qalabka neefsashada.

Hadii aanu qofku muujin dareen falcelis ee dhammaan tijaabooyinkaas oo dhan, taa macneheedu waxa weeye shaqadii maskaxda oo joogsatay qofkuna wuu dhintay. In kastoo uu qofku dhintay wadnuhu wali wuu garaacayaa waayo ogsajiintu wali wadnaha ayeey gaadhaysaa iyadoo la kaashanaysa qalabka neefsashada.

Waxa jiri kara waqtiyo markaas oo qofka dhaawaciisa awgeed aanu u awoodi karin in lagu sameeyo tijaabooyinka dhimashada maskaxda. Tusaale, dhaawac halis ah oo ka gaadhay wajiga in ay adkaato in loo dhawaado indhaha ama dhagaha. Xaaladahaas oo kale, tijaabooyinka sawir caafimaad ayaa lagu sameeyaa si loo hubiyo in wax dhiig ahi ay ku socdaan maskaxda, kuwaas waxaaka mid ah tijaabooyin sida midabeenta xiddidada dhiigga maskaxda ku yaal (skaanka sawirka cerebral angiogram ama cerebral perfusion).

Marka la hubiyo dhimashada, xubnaha kooxda cafimaadku waxay kala hadlayaan qoyska qofka tallaabooyinka ku xiga, taas oo ay ka mid tahay ka furidda qalabka neefsashada.

Waayo-arignimada qoys kastaa way kala duwan tahay, hase ahaatee waxay noqonaysaa waqtigan marka kooxda caafimaadku bilaabaya in ay kala hadlaan adiga iyo qoyskaaga suurtagalnimada ku-deeqidda xubnaha ama unugyada.

Dhimashada wadnaha

Waa maxay dhimashada wadnaha?

Dhimashada wadnaha waxay timaadaa marka qofku joojiyo neefsiga wadnuhuna joojiyo garaaca. Taasi waxay ku timaadaa xanuun degdeg ah ama shil, ama marka ugu dhambaysa xanuun raagey. Waxay kaloo ku timaada qofka madaxa dhaawac halis ahi ka gaadho dhaawacaas oo aan maskaxda u keenin inay dhimato, hase ahaatee uu qofka halis u yahay inaanu saani u neefsan karin joojtayn Karin garaaca wadnaha iskiis. Inta waqtigaa lagu jiro qalabka neefsashadu si ku meel gaadh ayuu neefsashada u wadaa si uu u joojtayo garaacista wadnaha dhiigana ku wareejiyo jirka oo dhan.

Xaladahaas oo kale, joojinta daaweynta waxtarka ah waxa keliya oo la sameeyaa markii sii-wadida daaweyntu aanay keenayn wax rajo bogsood ah „ dhimashadana aan laga kaaftoomi karin qofkuna uu ku jiro dhamaadka noloshiisa. Mudnaantu waxay tahay daryeelka dhimashada (palliative care) taasoo yaraysa xanuunka fududaynaysana daryeelka dhammaadka noloshaha. Joojinta daaweynta waxtarka ah mar kasta waa lagala hadlaa lana waafaqaa qoyska (iyo bukaan-socodka hadday suuragal tahay). Marka go'aan kaas la gaadho oo kaliya, ayaa laga hadli karaa ku-deeqidda ka dib dhimashada wadnaha.

Maxaa dhacaya ka dib markuu dhaqtarku rumaysto in wadnaha bukaan-socoka joojin doono garaacista?

Marka dhaqaatiirtu ogaato in ku sii-wadida daaweynta ee qalabka neefsashadu aanay waxba tarayn qofka, waxay kala hadlaan qoyska qofka talaabooyinka xiga oo oo la qaadi karo ayna ka mid yihiin doonista qofka dhammaadka noloshiisa iyo ka qaadida waxyaalaha aan u shaqaynayn sida qalabka neefsashada Marka laga furo qalabka neefsashada, neefsashada qofku ma geenayso ogsajiinka wadnaha. Wuxuuna wadnuhu joojinayaa garaaca waayo ma sii heliyo ogsajiin ka dibna dhammaan xubnaha kale ee jirku shaqada wey joojinayaan oo ka mid tahay maskaxda markaasna qofku wuu dhimanayaa.

Hadii dhaqaatiirtu raajeenayaan in uu qofku ku joojinayo neefsashada kuna dhimanayo 90 daqiiqo gudahood marka laga furo qalabka neefsashada waxaa markaas jiri karta fursad in la sameeyo ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada.

Ku-deeqidda ka dib dhimashada wadnaha waxa keliya oo ay suurtagal tahay muddada 90 daqiiqo gudahooda, sababtoo ah marka laga furo qalabka neefsashada ogasajiinka iyo dhiiggu way joojinayaan inay ku wareegaan jirka. Markaas xubnaha iyo unugaduna waxay bilaabaya in ay sii hallaabaan waayo waxay u baahan yihiin dhiig iyo ogsajiin si ay ugu sii haboonaadaan ku-deeqidda.

Hadii qoysku ogolaadaan ku-deeqidda, wax kastoo suuragal ah waa la sameyn si loo hubiyo fulinta doonistaas. Si kasta ha ahaatee, waxaa aad u adag in la saadaaliyo waqtiga saxda ah qofka ay ku qaadanyo inuu dhinto marka laga furo qalabka neefsashada iyo daawooyinka kale ee aan caawinayn. Bukaan-socodyada qaarkood waxay ku dhintaan 10 ama 20 Daqiiqo, ku-deeqiddauna waxaa laga yaabaa inay suuragal tahay. Qaar kalena ma dhintaan saacado ka dib. Hadday taasi dhacdo, ku-deeqidda xubnuhu suuragal maaha, hase ahaatee ku-deeqidda isha, wadnaha, lafta iyo unugyada maqaarku weli waa suuragal.

Hadii aanu qoysku ogolaan ku-deeqidda, daqtarku wuxuu qoyska kala hadlayaa ka furista qalabka neefsashada. Marka qalabka neefsashada qofka laga furo, wadnaha qofku wuu joojinayaa garaaca ogsajiin la'aan darteed, jirkooduna wuu qaboobayaa midabkuna wuu isbadalayaa waayo dhiiggu kuma wareegayo jirka.

Daryeel iyo ixtiraam ayaa la joogtaynayaa inta lagu jiro dhammaadka nololaha, ayadoon loo eegayn inay jirto ku-deeqid iyo in kale

Waayo-arignimada qoys kastaa way kala duwan tahay, marka ay dhaqaatiirtu rumaystaan qofka aad jeceshahay inaanu reysanahayn markaa kooxda caafimaadku waxay bilaabayaan in ay kula hadlaan adiga iyo qoys-kaaga haddii ay suuragal tahay ku-deeqidda xubnaha ama unugyada.

Maclumaadka iyo su'aalaha guud oo layska weydiyo ku-deeqidda

Maxaa ka mid ah qalliinka ku-deeqidda?

Qalliinka ku-deeqidda, waxaa lagu sameeyaa daryeel sida kan qalliinka kale, ayadoo jirka qofkana mar kasta loola dhaqmo si ixtiraam iyo sharaf leh. Qalliinkan waxaa fuliya dhaqaatiirta qalliinka oo aqoon sare leh iyo xirfad yaqaano caafimaad. Dhaqaatiir takhasus gaar leh iyo kooxdooda ayaa looga yeedhaa isbitaalo kale si ay u fuliyaan qalliinka.

Sida qalliinada kale, dalool qaliin ayaa lagu sameeyaa si loo soo saaro xubnaha, daloolkana markaa ka dib waa la xidhayaa waxaana lagu daboolayaa faashad. Ayadoo ku xidhan hadba xubnaha ama unugyada lagu deeqay, qalliinku wuxuu qaadan karaa in lagu dhamaystiro 3 ilaa 8 saacadood.qalliinada.

Maxaa dhacaya qalliinka ka dib?

Qalliinka ka dib, xubnaha lagu deeqay waxaa laga qaadayaa qolka qalliinka ilaa isbitaalka lagu samayn doono ku-tallaaliddaku-tallaalidda. Haddii ay doonayaan qoysku inay arkaan qofkoodii ay jeclaayeen qalliinka ka dib, waa loo diyaarinaya

Qofku miyuu muuqaalkiisu isbadalayaa?

Marka qofku dhinto, waxaa caadi ah inuu muuqaalkiisu isbadalo, jirkiiisuna wuu qaboobayaa, maaddaama dhiigga iyo ogsajiintu aysan ku wareegayn jirka. Si kastaba ha ahaatee, qalliinka ku-deeqidda kuma sameeyo isbadal weyn muuqaalka qofka. Daloolka qalliinka ee la sameeyey mudadii qalliinka lagu jirey waa la xidhayaa waana la owdayaa sida qalliinada kale kamana muuqanayso dharka qofka hoostiisa

Miyey saameyn ku yeelanaysaa aasida qofka?

Ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada wax saameyn ah kuma yeelaso diyaarinta aasida qofka. Eegista qofka ee sanduuqa furan ee aaska waa suuragal. Haddii koronarka (Coroner) loo baahdo inuu baadho, diyaarinta aaska dib bay u dhacaysa.

Goorma ayaa baarista koronarka (Coroner) loo baahan yahay?

Dhimashooyinka qaarkood, sida dhimashooyinka aan caadiga ahayn ama marka sababta dhimashada aan la garanahayn, ayaa sharcigu u baahdaa inuu baaro koronarka dowlad-gobaleedka ama teritooriga. . Xaladahaasi oo kale, waxaa laga yaabaa in loo baahdo baarista atoobsiga koronarka.

Badiba xafiiska Koronarka dowlad-gobaleedka iyo teratootiyada waxay siinayaan la xiriiir qareenada kuwaas oo bixiya macluumaad faahfaahsan iyo tageero markii loo baahdo baarista koronar.

Qoysku miyey badali karaan fikirkooda ku-deeqidda?

Haa. Qoysku waxay badali karaan fikirkooda ku-deeqidda ilaa inta qofka loo qaadayo qolka qalliinka.

Waa maxay ra'yiga diimeed ee la xiriidha ku-deeqidda?

Badiba diimaha waayeni way taageeraan ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada. Haddii qoyska ay hayaan su'aalo ay jecel yihiin inay kala hadlaan, shaqaalaha isbitaalka, ayaa siin kara macluumaad dheeraad, kana caawin kara la xidhiidhka hogaamiye diimeed.

Qoyska qofka miyaa laga filayaa inay bixiyaan qarashka ku-deeqidda?

Maya. Ma jiro wax qarash lacageed oo la weydiinayo qoyska marka la caddeeyo dhimashada qofka. Haddaa heshay wax sheekooyin ah ee ku saabsan ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada, fadlan la xidhiidh hayadaha ku-deeqidda ee dowlad-gobaleedka ama teritooriga ama xidhiidhiyaha ku-deeqidda xubnaha.

Xubnahee ama unugyadee lagu deeqayaa?

Shaqaalaha isbitaalku wuxuu qoyska kala hadlayaa xubnaha ama unugyada ay suurtagal tahay lagu deeqo. Taasi waxay ku xirantahay da'da qofka, taariikhda caafimaad, iyo xaaladu ku dhintay. Waxa qoyska la weydiin doona in ay xaqiijiyaan xubinta iyo unuga ay ogolaadeen in lagu deeqo. Waxaa la weydiin doona in ay saxiixaan foomka ogolaanshaha oo faahfaahinaya maclumaadkan.

Maclumaad ku saabsan xubnaha iyo unugyada lagu deeqi karo waxaa laga heli karaa bogagga soo socda.

Qoyska qofku miyey go'aan ku leeyihiin qofka qaadanaya xubnaha ama unugyada?

Maya. Siinta xubnaha ama unugyada waxaa go'aaminaya kooxda ku-tallaalidda ayagoo raacaya hab maamuuska qaraneed. Kuwaas waxay ku xidhan yihiin dhowr shuruudood oo kala duwan oo ay ka mid yihiin, liisaska sugida iyo qofka aadka ugu haboon, si loo hubiyo natijada ugu wanaagsan ee ku-deeqidda.

Xubnaha qofka ma hubaalbaa in la-beerayo?

Haddii qoysku ogolaado ku-deeqidda, wax kastoo suragal ah waa la sameynayaa si loo hubiyo in la fuliyo doonista. Si kasta ha ahaatee, mudada kudeeqidda mararka qaar kood waxaa cadaata in xubnaha lagu deeqey inay caafimaad ahaan ku haboonayn ku-tallaalidda. Shaqaalaha isbitaalka ayaa kala hadli doona qoyska haddii arintaasi soo baxdo.

Ku-tallaaliddaku-tallaalidda had iyo goor ma lagu guulaystaa?

Australia waxaa caalamka looga aqoonsaday ku guulaysiga ku-tallaalidda iyo mudada ugu dheer ee u noolaado qofka helay xubinta. Sida qalliinada kale waxaa jira khataro la xidhiidha qalliinka ku-tallaalidda. Si kasta ah ahaatee, badiya dadka helay xubin waxay aad uga faa'iidaystaan ku-tallaalidda waxaanay siin kartaa firfircooni noloshooda.

Qoysku miyuu maclumaad ka heli doonaa qofka ka faa'idaystey ku-deeqidda?

Sharciga Australia wuxuu xadidayaa ogaanshaha maclumaadka aqoonsiga ay wadaagaan qoysaska ku-deeqaha iyo kuwa qaataha. Si kasta ha ahaatee, shaqaalaha ku-deeqidu waxay siin doonaan maclumaad joogtaha ee xubnaha iyo unugyadala beeray, iyo horumarka qaataha xubinta. Qoyska ku-deeqaha iyo qof ku-tallaalidda helay waxay isu qori karaan warqado aan magac lahayn iyagoo sii marinaya heyadaha ku-deeqidda ee dowlad gobaleedka iyo teritoriyada

Maclumaadka iyo su'aalaha guud oo layska weydiyo ku-tallaaliddaku-tallaalidda

Ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada waxay badbaadiyaan oo si aad ah u horumariyaan noloshada dad badan kuwaas oo xanuunsanaya ama dhimanaya. Dad badan oo xanuun khatar ah hayo kaas oo la xiiira xubin hallaabtay, ku-tallaalidku-tallaaliddu waxa weeye rajada kaliya ee nolol caafimad qabta. Bogagga soo socda waxay ku siinayaan macluumaadka ku saabsan xubnaha iyo unugyada lagu deeqi karo iyo sababaha dadka qaarkiis ugu baahan yihiin in lagu tallaalo.

Ku-deeqidda wadnaha

Wadnuhu buxu ku buufiyaa dhiigga jidhka oo dhan, dhiiguna wuxuu u qaadaa ogsajiinka xubnaha kale oo dhan. Haddii wadnuhu si fiican u buufin waayo dhiigga, jidhka intiisa kale si dhakhso ah ayuu u bukoodaa. Dadka qaarkiis oo ay ku dhacdo wadnaha oo shaqeyn waaya, caabuuq fayras, ama wadnaha oo iin yeesha, waxay u baahdaan ku-tallaalidku-tallaalidda wadne si ay u noolaadaan. Ku-tallaalidda wadnaha waxaa la sameeya marka qaybaha daaweynaha kale oo dhan lagu guulaysan waayo.

Wadne aan-dabiici ahayn ayaa si ku-meel-gaarnimo ah loo sii isticmaalaa ilaa laga helaayo wadne banii-adam. Haddii aan wadnaha oo dhan aan la beerayn waxaa lagu deeqi karaa fakadaha yar ee wadnaha.

Ku-deeqidda sambabada

Sambabadu waxay siiyaan ogsajiin dhiigga waxanay ka qaadaan kaarboonka laba ogsaydh (carbon dioxide). Ku-tallaaliddaKu-tallaalidda sambabada waxaa badanaa u baahda dadka leh cystic fibrosis ama emphysema kuwaas oo sambabadoodu aysan gaadhsiiin karin ogsajiin ku filan jidhkooda. Labada sambab ayaa si wadajir ah loogu tallaali karaa qof qaate ah ama loo kala qaybin karaa laguna tallaali karaa ayagoo sambab kali ah laba qof oo qaateyaal ah.

Dad badan ayaa rumaysan in sigaar-cabiddu ay ka hortagayso ku-deeqidda sambabada. Si kasta ha ahaate, tani run maaha. Waxaa jira tijaabooyin lagu sameeyo qolka Daryeelka Dagdaga ah oo lagu baadho sida habboon oo sambabku u shaqeeyo ayadoo jawaabaha baaristaasina muujiyaan ku-haboonashaha ku-deeqidda.

Ku-deeqidda kalyaha

Shaqada kalyaha ugu weyn waxa weeye inay dhiigga ka sifeeyaan waxii qashin ah. Marka jirku ka qaato wuxuu u baahan yahay cuntada, qashinka waxaa loo diraa dhiigga, ka dibna kalyaha ayaa sifeeya, jidhkana waxaa looga saaraa kaadi ahaan. Haddii kalyaha waxyeello soo gaaadho ama bukoodaan oo dhiigga si fiican u sifeyn waayaan, qashinka ayaa dhiigga ku urura wuxuuna waxyeelleeyaa jidhka.

Dadka kalyo xanuunka daran ku dhaco waxaa loo sameeyaa kalyo-safayn (dialysis), kaasoo ka sifeeya waxyaalaha qashinka ah dhiigga marka ay kalyuhu samayn waayaan. Si kasta ha ahatee, dad badani oo kuwaas ka mid ah waxay u baahan doonaan ku-tallaalid kalyo si ay u noolaadaan. Labada kalyood hal mar ayaa wadajir loogu tallaali karaa hal qaate, ama ama waxaa loo kala qaybin karaa laguna tallaali karaa labo qof.

Ku-deeqidda beerka

Beerku waa xubin kakan oo shaqooyin badan qabata, shaqadeeda ugu wayni waxa weeye in ay isku dheelitirto nafaqooyinka (sida sonkorta, fatamiinka, iyo duxda), iyo inay saarto waxyaalaha qashinka ah iyo inay joogtayso xinjirowga dhiigga.. Dadka qaba beer-xanuunka dheefshiidka, Hepatitis B ama C ama iin ku leh beerka sida Biliary Atresia waxay u baahan doonaan ku-tallaalid beer si ay u sii noolaadaan.

Beerku waa xubin cajiib ah maaddaama ay dib-u-kori karto. Taas macnaheedu waxa weeye beerka qofka wayn waa la yarayn karaa qiyaastiisa waxaana lagu tallaali karaa ilmo yar halkaas oo markaas ka dib uu ku kori karo ilmaha dhexdiisa. Sidaas baddalkeeda, beerka waxaa loo kala qaybin karaa laguna tallaali karaa laba qaate.

Ku-deeqidda xameetida

Xameetidu waxay ka kooban tahay unuugyo la yidhaahdo Islets oo soosaara insulin si ay u dheelitirto heerarka sonkorta ee dhiigga jidhka. Dadka qaba sonkorowga Nooca-1, xameetidu waxay sii daysaa in yar oo insulin ah ama wax ma siidayso, aad bayna u adag tahay inay ilaaliso heerarka sonkorta ee dhiigga xitaa haddii lagu duro insulin. Waqtiga hadda badiba ku-tallaalidda xameetida waxaa lagu sameeyaa dadka qaba Sonkorowga nooca 1 kuwaas oo keeni kara kalyaho oo istaaga. Sababtaas darteed xameetida waxaa badanaa lala beeraa kalida qofka isla ku-deeqaha ah.

Ku-deeqidda islet-ka xameetida

Waxaa jira waqtiyo aysan suuragal ahayn in la tallaalo xameetida oo xubin dhammaystiran ah. Si kasta ha ahatee, unugyada islet-ka ee soosaara insulin ka xameetida ayaa si gaar ah loo tallaali karaa si loo daaweeyo sonkorowga.

Ku-deeqidda unugyada isha

Ku-deeqidda unugyada isha waxaa lagu tallaali karaa wiilka iyo xaydhka isha. Wiilka ishu waxaa weeyey unug saafi ah kaas oo ku wareegsan qaybta midabka leh ee isha. Waxay ogolaataa inuu sii gubo ilaysku ratiinaha (retina), taaso aragga keenaysa. ku-tallaalidda wiilka ishu wuxuu dadka u soo celiyaa aragtida dadka kuwaas oo qayb ahaan indha la' ama gabi ahaanba indha la' taas oo ay ugu wacan tahay wiilka wax ka gaadheen taasoo ay keentay xaalad la iskadhexlay, xanuun ama dhaawac. Xaydhka ishu waa qaybta cad ee ku wareegsan isha. Tallaalka xaydhka isha waxaa la sameeyaa si looga hor-tago indha la'aanta sababtoo ah dhaawac ama dad isha laga saaray kansar ku dhacay owgeed.

Ku-deeqidda lafta

Unugyada lafta ee lagu deeqay ayaa la-tallaali karaa si loogu baddalo lafta baxday taas oo ka dhalatay buro ama cuduro kale ama shilal. Waxay kaloo loo adeegsadaa inay caawiso bogsiga jabniinka, waxayna adkaysaa baddalidda miskaha iyo kala-goyska jilibka, iyo inay toosiso qalooqa lafdhabarka (scoliosis) ee caruurta iyo kureyada . Ayadoo ku xidhan nooca ku-tallaalidda loo baahan yahay wax ka badan toban qof ayaa ka faa'idi karta ku-deeqidda lafta ookaliya.

Ku-deeqidda maqaarka

Dadka u soo gaadhay jirdil balaadhan, caabuuq waxyeelay, ama baabi'yey maqaarka, ama gubasho daran waxay u baahan karaan tallaal maqaar si uu ugu soo noqdo caafimaadkii mar labaad.

Marka lagu deeqo maqaar, xuub khafiif ah ayaa dib usoo baxa, sida xuubka ka diirma jidhka cadceedu gubto oo kale. Inta badan waxaa laga soo jaraa dhabarka qofka ama xaga dambe ee lugahooda. Celcelis ahaan, jidhka saddex qof ooku-deeqe ah ayaa looga baahan yahay halkii qof oo qaate ah.

Ku-deeqidda unugyada wadnaha

Marka lagu deeqayo wadnaha xubin dhan ahaan, unugyada wadnaha si gaar ah baa loogu deeqi karaa. Unugyada wadnaha ee lagu deeqay sida fakadaha wadnaha waxaa sida kowaad loogu adeegsadaa dayactirka iinta wadnaha ee caruurta iyo cunugyada yar yar. Unugyada waxaa kaloo loo isticmaali karaa si loogu baddalo fakadaha wadnaha bukooda ee dadka waaweyn.

Mahad-celin

Waanu doonaynaa inaan u mahadnaqo dadka soo socda tabarucodii qiimaha lahaa ee ay ku kordhiyeen soo-saarista buugan.

- ▶ Qoysaskii ku-deeqeyaasha xubnaha iyo unugyada ee geesinimadooda nala qaybsaday waayo-aragnimadoodii.
- ▶ Qaateyaashii tallaalidda ee nala qaybsaday sheekoyinkoodii iyo erayadoodii mahadnaqeed
- ▶ Wakiiladii haya'daha ku-deeqidda xubnaha iyo unugyada kuwaas ee waayaragnimadooda urursanayd ku taageeray qoysaska kudeeqaha iyo kuwa qataha ah waxay caawiyeen in la soosaaro ama la qaabeeyo buugan.
- ▶ Gaar ahaan waxaan ugu mahadnaqaynaa Teresa Spencer Plane – hogaamiyaha dhaqdhaqaaqa hospice ee Australia, la-taliyaha iyo baraha muruugada . Waayo-aragnimadeeda shaqsi ee ku-deeqidda xubinta waxay ku dhiirigelisey inay u qorto buuggii ugu horeeyay qoysaska ku-deeqaha ah oo lagu magacaabo Caring Strangers. Howlkarnimadeedii waxay nagu dhiirigelisey inaan wax ku sii kordhino shaqadeedi hore.
Anigoo ku hadlaya magaca Shabakadda DonatLife, bulshadayada iyo qaateyaasha xubnaha waxaan kuugu mahadnaqaynaa deeqsinimadaad aad ka fakarayso dadka kale.



Bidhaamin —Taageeridda Qoysaska ka qaybgalay barnaamijka kudeeqidda xubnaha iyo unugyada



Ma jirto erayo fudud oo ku jira diiwaanka oo ka adag si loo sharxo mahadnaq aan kuu hayo ee ku-deeqaha iyo qoyskiisa.

Mahadsanid kali ahi kuguma filna.”

Hooyada qaataha unugyada carruurta.

Somali



An Australian Government Initiative

Bidhaamin (In Reflection)

Telefoon: 02 6198 9800

Faagis: 02 6198 9801

enquiries@donatelifegov.au

www.donatelifegov.au

